Garo Xuquuqdaada Shaqo

AASAASKA MIQYAASYADA SHAQAYSIINTA EE ONTARIYO

SAXIIXA HESHIISKA

Ha iska saxeexin xuquuqdaada. Haddii aad saxiixdo heshiis leh shuruudo ka hooseeya mustawaha ugu hooseeya, sarkaalka kaa saxiixay waa xeer jebiye adna ma tihid ka xeerka jebiyay. Xattaa haddii aad saxiixdo, weli waxa aad xaq u leedahay xuquuqdaada sharci ahaan.

MISHAHARKA UGU YAR

Waa in lagu siiyaa ugu yaraan misharka ugu yar saacadiiba. Shaqaalaha oo dhani ma wada laha shaqooyin uu misharka ugu yari xeer u yahay, shaqooyinka qaarkoodna waxa ay leeyihiin heerar ka gedisan.

MISHAR ISKU MIDA SHAQADA ISKU MIDKA AH

Laga bilaabo Abril 1da, 2018, Loo shaqeeyayaashu ma bixin karaan in ka hoosaysa miqyaaskaaga shaqo. Haddii aad tahay badh-shaqeeye, ku-meel-gaadh, mid aan heshiis lahayn ama shaqaale-xilli, aadse qabanaysid shaqo badanka u dhaw shaqada shaqaale waqti buuxa leh, in ka yar laguma siin karo. Haddii aad shaqada ku heshay hay'adaha gargaarka ku-meel-gaarka, aadse qabanaysid shaqo u dhaw shaqaalaha joogtada ah, laguma siin karo in ka yar. Annaga na soo wac, si aad war dheeraad ah, u heshid.

SAACADAHA WIIGA

Saacadaha ugu badan ee sarkaalkaagu kaa shaqaysiin karo wiigii , waxa weeye 48 saacadood. Haddii sarkaalkaagu doonayo in aad in ka badan shaqaysid, waa in lagu waydiisto in aad saxeexdid heshiis qoraal ah, sarkaalkaaguna waa in uu ka helaa ogolaansho Wasaarada Shaqada. Xaq ayaad u leedahay in aad diido.

SAAACADA MAALINTA IYO NASASHADA

Saacadaha ugu badan ee aad shaqo keliya maalintii ka shaqayn kartaayi waa 13. Waxa ku jira nusa saaco nasasho bixin-lahayn 5tii saacadood ee aad shaqaysaba. Sarkaalkaagu kuguma qasbi karo in aad shaqyso in ka badan "shaqada caadiga ah ee maalinta". Waxase jira xaalado gaar ah oo lagu weydiisan karo in aad sii joogto waqti dheeraad ah.

WAQTIGA DHEERAADKA AH

Marka aad shaqayso 44 saacadood halkii wiig, waa in lagu siiyo 1.5 jeer misharkaaga caadiga ah. Waxa aad qoraal ahaan ku beddelan kartaa waqti fasax ah halkii misharka. Waa in aad hesho 1.5 jeer oo fasax ah halkii saac ee dheeraad ahba. Miyuu dhexdhexaadiyaa sarkaalkaagu shaqadaada dheeraadka ah dhawrkii wiigba? Taa macnaheedu waxa weeyi, adiga waxa ay kuu tahay mishahar ka yar kaad heli lahayd!

10 CISHO OO QOFKU FASAX DEGDEGA U LEEYAHAY

Waxa aad xaq u leedahay 10 cisho oo fasax dedega sanadkiiba. 2da cisho ee hore waa lagu siin doona misharkooga caadiga ah. Fasaxan waxa laguu siiyay caafimaadkaaga, hadii dhaawacantid, hadii daaweyn degdega u baahan tahay iyo dhimashada, xanuunka, dhaawaca, daaweyn degdega ama arrin degdega ah ay timaado xubnaha qoyskaaga. Looshaqeeyahaagu kuma weydiin karo in aad qoraal ka keento dakhtarkaaga si aad 10ka cisho u qaadatid. Looshaqeeyahaaga waxa laga rabaa in uu fasaxan ku siiyo, kugumana ciqaabi karo, haddii aad qaadatid.

FASAXA DHIBAHA GURIGA IYO GALMADA

Haddii adiga ama ilmahaagu la soo gudboonaato dhibo guri ama galmo ama cabsi dhib guri ama galmo, waxa aad xaq u leedahay 10 cisho ilaa 15 wiig oo fasax ah. 5ta maalmood ee ugu horaysa ee sanadkiiba, waa lagu siin doonaa misharkii caadiga ahaa. Inta kale lagu siin mayo mishahar. Waa in aad ugu yaraan 13 wiig u shaqaynaysay looshaqeeyahan, si aad fasaxan aad u heshid.

FASAXA

Marka aad 1 sano u shaqaysid looshaqeeye isku mid ah, waxa aad xaq u leedahay 2 wiig oo fasax mishaharle ah. Waxa aad xaq u leedahay 4% fasax bixis leh doolarka kasta oo aad shaqaysatidba. Lacagtaada fasaxa, waa in lagu siiyo, marka aad fasaxa u baxaysid. Haddii aad 5 sano u shaqaysid

Workers' Action Centre
416-531-0778
Toll Free: 1-855-531-0778
www.workersactioncentre.org

looshaqeeye isku mid ah, waxa aad xaq u leedahay 3 wiig oo fasaxa oo la socoto 6% fasax bixis leh. Looshaqeeyayaashu waxa ay ku weydiisan karaan in aad qoraal ku ogolaatid in laguugu daro jeegagaa mishaharka, 4% ee fasax bixiskaaga (ama 6% 5 sano ka dib), waxaadse mar kasta xaq u leedahay fasaxaaga in aad qaadato. Haddii aad shaqo ka tegtid adiga oo aan fasaxaaga qaadan, waxad qaadataa lacagtaada fasaxa ee aad ku leedahay.

FASAXYADA SHACBIGA

Ontariyo waxa ay leedahay 9 maalmood oo fasax shacbiya: Maalinta Sanadka Cusub, Maalinta Qoyska, Jimcaha Wanaagsan, Maalinta Fiktoriya, Maalinta Kanada, Maalinta Shaqada, Maalinta Mahadnaqa, Maalinta Dhalashada Ciise, Maalinta Sadaqada. Waa in aad shaqaysid waqtigaaga caadiga ah ka hor iyo ka dambeyn maalinta fasaxa, si aad u heshid mishaharka maalinta fasaxa shacbiga. Mishaharka maalinta fasaxa shacbiga, waxa loo xisaabiyaa iyada oo la isku geeyay mishaharka aad shaqaysatay maalin walba xilli-shaqeedkii ka horeeyay maalinta fasaxa shacbiga oo loo qaybiyay wadartooda, inta maalmood ee aad shaqaysay xilli-shaqeedkaa. Haddii aad shaqayso maalin fasax shacbiya, waxa aad heshiis qoraal ah ku geli kartaa mishahar sare (1.5 jeer heerkaaga mishahar ee caadiga ah), iyo mishaharka fasaxa shacbiga AMA in aad ku shaqayso mishaharkaaga caadiga ah iyo fasax aad maalin kale qaadato oo ay la socoto mishaharka fasaxa shacbiga.

DIGNIIN ERIS AMA MISHAHAR

Sarkaalkaagu wuu ku eryi karaa bilaa digniin, haddii 3 bilood wax ka yar aad shaqaysay. 3 bilood wixii ka badan, sarkaalkaagu waa in uu ku siiyaa digniin qoraal ah oo ay ku cadahay maalinta shaqada kuugu dambeyn doonta. Haddii aanad digniin helin, waxa aad xaq u leedahay in mishahar laguugu beddelo. Lacagta aad eryista ku heleysid iyo digniintuba, waxa ay ku xidhan yihiin inta aad u shaqaysay sarkaalkan, ilaa ugu badnaan 8 wiig. Haddii aad shaqada ku heshay hey'ad gargaarka ku meel-gaara ah oo lagu siiyay shaqo 3 bilood ah ama in ka badan, hase yeeshee waqtigaa hortii lagu eryay, waxa aad xaq u leedahay 1 wiig oo digniin ah ama mishaharkiisii.

SHARCIGAN AYUU KU DABAQAN YAHAY?

Xattaa hadii aad tahay badh-shaqeeye, ku meel-gaar, qof hey'ad soo dirtay amaba aanad lahayn sifo gaar ah, xaq ayaad ku leedahay sharcigan XMS (Xeerka Miqyaasyada Shaqaysiinta). Wasaarada shaqadu waxa weeye Waaxda Dawlad Goboleedka ee socodsiisa xuquuqda shaqada iyo shaqaalaha. Waa meesha ay shaqaaluhu u soo dacwoon karaan haddii aan mishahar la siinin ama dacwado kaleba ay qabaan. Waa adeeg bilaa lacaga ah. Shaqaalaha oo dhan si looguma wada adeego xeer ahaan. Shaqaalaha qaarkood, sida kuwa beeraha ka shaqeeya ama dhulka hagaaja, ma laha xuquuqda mishaharka ugu yar, mishaharka dheeraadka ah ama mishaharka maalmaha fasaxa shacbiga. Haddii aad iskaa aad u shaqaysato, sharciga XMS kuma daboolayo. Haddii uu sarkaalkaagu kugu sheego qof isagu iskii u shaqaysta, si uu mishahrkaaga u yareeyo, aadse tahay shaqaale u shaqeeya, waxa tan la yidhaahdaa waa tilmaan qalad ah.Tan sharcigu waa diidan yahay! Waxa aad dacwad u gudbin kartaa Wasaarada Shaqada ama waxa aad tegi kartaa maxkamada dacwooyinka yaryar, wixii mishahar ah ee kaa maqan. Wac Wasaarada Shaqada si aad xogo dheeraada uga hesho, kuna saabsan shaqada aad heyso.

WARARKA XUQUUQDA SHAQAYSIINTA

Looshaqeeyahaagu waa in uu Meesha aad ka shaqayso ku dhejiyaa ogaysiin sheegaysa miqyaasyada shaqaysiinta ee shaqada aad haysaan, si ay shaqaalaha oo dhani u arki karaan. Ogaysiinta waxa la yidhaahdaa "Wax aad u baahan tahay in aad wax ka ogaato Xeerka Miqyaasyada Shaqaysiinta ee Ontariyo". Looshaqeeyayaasha waxa lagaa rabaa in ay ogaysiinta nuskhad ka siiyaan qof kasta oo shaqaale cusub ah. Waa in aad hesho nuskhadan mudo 30 cisho gudahooda, laga bilaabo markii shaqada aad gashay. Waxa aad xaq u leedahay in aad weydiisato nuskhad ku qoran afkaagii hore.

Workers' Action Centre
416-531-0778
Toll Free: 1-855-531-0778
www.workersactioncentre.org

MAXAA SOO SOCDA 2019

$15 Guud ahaan mishaharka ugu yar:

- $14.10 mishaharka ugu yar oo ayay yeelan doonaan ardayda 18 ka yar
- $13.05 mishaharka ugu yar oo ayay yeelan doonaan adeegayaasha khamrigu

Jadwal Cadaalad ku Dhisan:

- Waxa aad xaq u yeelan doontaa in aad diido xilliyo shaqo haddii uusan sarkaalkaagu ku siin ogaysiis 4 cisho ah (96 saacadood), iyada oo shaqadaaduna ay sugan tahay.
- Waxa aad xaq u yeelan doontaa in aad weydiisato in xilli ama meel shaqo lagaa beddelo, marka aad 3 bilood sharikad aad u shaqayso, iyada oo shaqadaaduna ay sugan tahay.
- Waxa aad heli doontaa 3 saacadood oo mishahar leh haddii xilli shaqo lagaa joojiyo wixii 2 cisho oo ogaysiis ah ka yar.
- Shaqaalaha fooniyaha ku xidhan, waxa ay yeelan doonaan 3 saacadood oo mishahar leh haddii aan loo yeedhin ama ay shaqeeyaan 3 saacadood in ka yar.

GARGAAR IYO TAAGEERO

Xarunta Hawlaha Shaqaalaha

Ontariyo waxa ka jira xeerar kale oo shaqada kugu ilaaliya sida Xuquuqda Bini-aadanka ee Ontariyo iyo Xeerka Caafimaadka iyo Nabadgelyada Shaqada. In aad adeegsato qareen ama ku dacwooto maxkamada dacwooyinka yaryar, ayaa iyana ah dariiqyo kale oo lagu heli karo mishaharooyinka maqan. Waxa aad soo wacdaa Khadkayaga Kulul ee Xuquuqda Shaqaalaha si aad gargaar iyo tilmaamo aad u hesho. Wararkayaga xaashiyaha xaqiiqo sheega ee wartebiyaha electrooniga ah, ayaa iyana ku siin kara warar badan oo shaqada iyo shaqaalaha ku saabsan.

416-531- 0778
www.workersactioncentre.org

Wasaarada Shaqada

Kala xidhiidh Wasaarada Shaqada wixii warar ah ee ku saabsan xuquuqda uu kuu ogol yahay Xeerka miqyaasyada Shaqaysiintu iyo sida aad dacwo u qoran karto. Gal oo siyaaro mareegtooda si aad u hesho adeegyo kale oo kaa caawin kara xisaabinta mishaharooyinka maqan.

1-800- 531-5551

Workers' Action Centre
416-531-0778
Toll Free: 1-855-531-0778
www.workersactioncentre.org